



Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.excalibur.org.uk

Talaada 10^{ka} Febraayo 2026

Gacaliyayaal Qoysas,


Waad ku mahadsan tihiin in aad fasallada soo booqataan usbuucii hore. Aad ayey u wanaagsanayd in aan dhammaantiin idiin aragno idinkoo dhoolla-caddeeynaaya si wadajir ahna u faraxsan.

Sidoo kale, aad ayaan idiinkaga mahadcelineynaa taageeradiinna ku aaddan hubinta in carruurtiina jaakadahooda iyo funaanadahooda aad ku qortaan magacooda si marka looga tago dugsiga aan u awoodno in aan idiin soo celinno.

Maalinta Safer Internet Day waa maanta waxaana diiradda la saari doonaa 'farsamo caqli leh, doorasho nabdoon- U kuurgelidda badbaadada iyo mas'uuliyadda isticmaalka AI'. Waxaan qabaneynaa kulanno-guud si loogu dabbaaldego maalintaan iyo sidoo kale casharro dheeraad ah oo ku saabsan kombiyuutarka. Fadlan fiiri mareegtaan ku saabsan sida qoysaska ay ugu caawin karaan carruurta in ay ku nabdoonaadaan internetka. <https://saferinternet.org.uk/safer-internet-day/safer-internet-day-2026/top-tips-for-parents-and-carers>



Usbuucaan waa Usbuuca Caafimaadka Maskaxda ee Carruurta waxaanna xasuusineynaa carruurta muhiimadda caafimaadkeenna maskaxda iyo sida ay ula mid tahay caafimaadka jirka si aan u ilaalinno caafimaadna aan ku nagaanno. Waxaan ka munaaqashoon doonaa arrimo muhiim ah sida jimicsiga, in dibadda loo baxo, la isticmaalo fekerka hagaagsan iyo la ciyaaridda saaxiibbada.



Dhawaanahaan waxaa jiray soo daahid fasallada oo dhan ah – waxaan rabnaa in carruurta oo dhan ay waqtiga ku yimaadaan si ay u seegin waxbarashada. Fadlan carruurta ka caawi in ay yimaadaan dugsiga si ay fasallada u galaan 8:45. Diiwaangelinta waxay ku eg tahay 8:50 marka albaabka cagaaran la xero markaasoo ay carruurta ka soo geli karaan dhanka xafiiska.

Aad ayaad ugu mahadsan tihiin taageeradiinna oo dhan waxaanna rajeyneynaa in aad fasax wanaagsan qaadan doontid marka uu noo yimaado.

Mahadsanidiin,
Mrs L-H



Attendance

Imaanshaha

Celceliska imaanshaha dugsiga oo dhan usbuucii hore wuxuu ahaa **94%** kaasoo u dhaw **yoolkeenna 96%**. Waxaa mahadsan Fasalka 6 kaasoo dhaafay yoolka **96% heleyna 97%** imaansho usbuucii hore.

Waxaan ognahay in filashada Dowladda iyo Cabotay yihiin in carruurta dugsiga yimaadaan maalin walba marka laga reebo marka ay aad u xanuusan yihiin.

Haddii canuggaada uu buko uuna dugsiga imaan karin, fadlan xafiiska dugsiga kala soo xiriir 01173772630 si aad noogu sheegto. Waxaa laga yaabaa in aan guriga kugu soo booqanno haddii aan war kaa helin waxaana laga yaabaa in aan sameyno booqasho bad-qab hubin haddii uu canuggaada maalmo badan xanuunsan yahay

Fasaxyada waa in tikidka la goostaa waqtiga uu dugsiga fasax yahay, ganaax ayey kuu soo diri kartaa Xukuumadda Deegaanka haddii canuggaada uu dugsiga imaaneynin. Ma dooneyno in mid ka mid ah caruurta uu seego xaqooda.

Ramadan

Waxaan ku baraarugsannahay in uu Ramadaanka billaabanaayo inta fasaxa lagu jiro, waxaanna dhawreynaa in aan si shuraako ah u wada-shaqeyno si aan u qorsheyno xafladdeenna Ciidda.



Kids with Bricks

Miss Zetter waxay sameysaa Naadiga Kids with Bricks Club kaasoo xilligaan ku mashquulsan Ciyaaraha Qaboobaha iyo dhisidda waxyaabo lala xiriiryo sida Bob ski, winter cabin iyo a skier. Waddanka waxaa ka jira ka badan 400 Naadiyo, waxaanna ka galnay kaalinta 3^{aad} usbuucii hore. Fadlan booqo <https://www.kidswithbricks.com/voting->



[page](#) U codee habkeenna qurxoon.



Taariikhaha Xusuus-Qorka

Usbuuca billaabanaaya 10^{ka} Feb Usbuuca Caafimaadka Maskaxda ee Carruurta
10^{ka} Feb – Maalinta Badbaadada Internetka
16^{da} Feb- 20^{ka} Feb – Fasaxa Xilliga
23^{da} Feb, Dugsiga ku soo noqoshaha iyo usbuuca imtixaannada.

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumo warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630